

Helitaanka Fudud ee Diiwaannada Talaalka Naftaada iyo Qoyskaaga

Ablikeeshinka moobilka bilaashka ah ee Docket ayaa kuu sahlaya:

- Inaad gasho diiwaannada talaalka.
- Inaad akhrido talaallada aad qaadatay.
- Inaad aragto noocyada talaallada aad u baahan tahay.



Saddex talaabo oo fudud ood diiwaankaaga talaalka uga geli karto Docket

1. Furo ciwaankaaga.

- Soo dagso ablikeeshinka bilaashka ah ee Docket ood ku shubanayso taleefankaaga. Ku gal iimeelka, ciwaanka Apple, ama Google.


2. Raadi diiwaannadaada talaalka.

- Ka dooro “Immunizations (talaallada)” dookhyada waawayn.
 - Qof kasta oo haysta iimeel sax ah ama lambarka taleefanka oo ugu qoran galka Xariirka Xogta Talaalka Minnesota (MIIC) ayaa arki kara diiwaanadiisa. Haddii aadan arki karin diiwaannadaada ama kuwa qoyskaaga adoo adeegsanaaya ablikeeshinka Docket, booqo [Hel Diiwaankayga Talaalka \(www.health.state.mn.us/people/immunize/miic/records.html\)](http://www.health.state.mn.us/people/immunize/miic/records.html).
 - Waxaa jiri kara waqtiyo ay dad badan iskudayayaan inay galaan diiwaannada taasoo keenaysa in waqtiga sugitaanku dheeraado. Fadlan la soco barta Twitter ka ee Docket @dockethealthapp si aad u hesho wararkii ugu danbeeyay ee la shaaciyo.

3. Ilaali caafimaadka oo la soco wacyiga jira.

- **Xaqiijinta Fudud ee talaalka:** Gal diiwaannada talaalka Minnesota ee loogu baahan yahay dugsigu, shaqada, iwm.
- **Kudar xubnaha qoyska:** Arag talaallada qoyskaaga adoo isticmaalaaya hal ciwaan oo Docket ah.

Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan ablikeeshinka, i-meel udir support@dockethealth.com. Haddii aad rabto xog dheeraad ah oo ku saabsan diiwaannada talaalka ee MIIC, booqo webseedka Xariirka Xogta Talaalka Minnesota (MIIC) (www.health.state.mn.us/miic).



docket™